NSW GOVERNMENT | Education Public Schools

SCHOOL SWIMMING AND WATER SAFETY PROGRAM

Message to Parents / Caregivers

# Fariin loogu talagalay waalidka / Xannaaneeyayaasha

NSW Department of Education Qorshaha Dabaasha Dugsiga waa barnaamij deg deg ah oo dabaal barasho ah, kaas oo kor u qaadaya kalsoonida biyaha oo siinaya ardeyda xirfada aas aasiga ah ee ammaanka biyaha samata baxa. Qorshahan waxaa la fulinayaa muddo toban maalmood ah. Cashar maalmeed kastaa waa 45 daqiiqo.

Ku talagal ayaa laga sameeyey si loogu daro manhajka dugsigayaga barnaamijka dabaasha. Ardeyda aan gaarin heer lagu qanci karo oo ah xirfada ammaanka biyaha iyo samata baxa, oo aan awoodin inay dabaashaan 25 m iyagoo isku kalsoon oo aan la caawineynin biyo mool ah ayaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan qorshaha dabaasha ee dugsiga. Qorshuhu wuxuu xooga saarayaa carruurta dabaasha ku liidata ee dhigata Years 2 and 3 laakiinse wuxuu sidoo kale waxka qabanayaa carruurta dabaasha ku liidata ee dhigata Years 4 to 6 iyo sidoo kale baahida khaaska ahaan ardeyda dhawaanta timid Ustareeliya iyo ardeyda iinta leh.

Istilmaamida waxay ka dhaceysaa ________________________________. Qorshuhu wuxuu soconayaa
Name of pool

maalin kasta ilaa **Laba todobaad oo laga bilaabo** ____________________ ilaa ____________________
Start date Finish date

Safarku wuxuu ____________________________qiimuhuna waa $______________________ maalintii.
Means of transport Daily transport cost

Qiimaha gelida berkada dabaashu waa $___________________maalintii. Istilmaamidu wax lacag ah leyska
Daily pool entry cost

qaadi maayo.

Qiimaha qorshaha ee10 maalmood ahi waa $__________________.
Total cost

Ilmo kasta waa inuu soo qaataa dharka dabaasha, shukumaan, canbuur ama shaar, koofiyad iyo dhar ku diirinaya maalinta qabow. Meesha ay istilmaamidu ka dhacayso berkad dabaaleed aan dedneyn, waxaa lagu talinayaa inay ardeydu isticmaalaan wax qoraxda ka ilaalinaya oo ku filan, tusaale SPF 30+ aragti balaaran leh, muraayadaha dabaasha oo biyaha u adkeysi u leh, oo si joogta ah loo isticmaalo , garan ama shaati ayaa sidoo kale lagu talinayaa ( haddii ay tasiilaadka berkada dabaashu ogolaato).

Ardeyda waxaa la qiimeynayaa inta uu socdo qorshaha dabaasha dugsiga ee dhammaan xirfadaha ammaanka biyaha iyagoon xirneyn muraayadaha dabaasha.

Haddii ilmahaagu xaq u leeyahay qorshahan, fadlan buuxi oo saxiix foomka ogolaansha kuna soo celi macalinka fasalka ilmahaaga.

**Maamule:**_______________________________________________ **Taariikhda** : ________________
Name of principal Date

SOMALI